



Wakhtiga codsashada 18.8—11.9.2025

Satakieli: Kulamada ay wadaagaan dugsileyda iyo ardeyda jaamacaduhu

Ilmahaagu muu rabi lahaa inuu khibrado cusub ka helo Helsinki oo uu la wadaago ardeyda? Ilmahaagu muu ka faa'idi lahaa inuu qof wayn oo ammaan ah wakhti siiyo?

Sannad-dugsiyeedkan inta lagu jiro carruurta 9—12 sano jira waxaay fursad u haystaan inay toddobaad kasta la kulmaan tababare. Tababaruhu waa ardey jaamacadaha Helsinki oo mid ah dhigta. Satakieli ayaa furaya albaabada jaamacadaha wuxuuna ku dhiirigalinayaa waxqabad xiio leh.



MENTORSPROGRAMMET
NÄKTERGALEN

Ilmahaagu wuxuu helayaa tusaale jaamacad dhigta

Kulamo wanaagsan oo toddobaadle loo soo lahaa illaa sannadkii 2022

Ilmaha iyo tababaruhu toddobaad kasta ayaay dugsiga dadadii dhowr saacadood kulmayaana inta u dhaxeysa bisha Maayo illaa Oktoobar wax wanaagsan ayaayna wada qabanayaan. Waxqabadku wuxuu noqon karaa tusaale ahaan jimicsi, farshaxan, wax dubis, booqasho muyuseeyum, ciyaarid ama wax kasta oo kale oo ay iyagu qorsheeyaan.

Tababaraha iyo waalidka ayaa dhexdooda ka heshiinaya sida loo wada soconayo ee loogu kulmayo Helsinki dhexdeeda. Barnaamijka Satakieli fikraddiisu waxaay ka timidday Malmö, halkaas oo lagu bilaabay si fursado jimicsi oo isku miisaaman loogu furo carruuraha kala duwan.

Barnaamijka Satakieli ujeedadiisu waa in ilmuhu uu helo tusaale qof wayn oo jaamacad dhigta waxaana kulamadaas loo adeegsan karaa in kalsoonida la dhiso oo la sii balaadhiyo aragtiyada ku saabsan waxbarashada. Barnaamijku jaamacadda Helsinki ayuu ka bilaabmay sannadkii 2022.

Ayuu ku socdaa?

Satakieli waa barnaamij magaalada Helsinki ay leedahay oo carruurta cilmi-baadhistu muujinayso inay hadhow ku dhibaatoon karaan codsashada waxbarashada sare taageeraya

.
Barnaamijka Satakieli kooxda loogu talo galay waxaa ka tirsan:

1. Ardeyda ka soo jeeda qoysaska aanay waalidkood waxbarashada heer sare ka gaadhin iyo/ama
2. Carruurta ajinabiga ah iyo/ama
3. Carruurta u baahan inay hal tusaale oo qof wayn ah oo dheeraad ah helaan.



Ka qaybqaadashada macnaheedu waa maxay?

Ilmahaagu waa inuu wakhti u haystaa inuu tababarihiisa toddobaad kasta dhowr saacadood kala kulmo, maadaama muddada tababrku ay ku dhisantahay kulamada joogtada ah. [Wakhti fiican in loo helo barnaamijka waxaay shardi u tahay ka qaybqaadashada barnaamijka.](#)

Cayimisku wuxuu kabayaa tababaraha iyo carruurta laakiin walaalada ama carruuraha kale ma kabayo taas macnaheedu waa inaanay kulamada ka soo qaybqaadan. Tababareyaashu waa arday waxbarasho heer sare ama jaamacadeed dhigta oo loo waraystay loona doortay shaqadaas. Waxaay sidoo kale barnaamijka u soo dirsadeen warbixinada ammaanta ah iyo warbixinada dambiilenimada, oo lagu xaqiijinayo inaanay dambiyo galin.

Macluumaad dheeraad ah oo barnaamijka ku saabsan waxaad ka haysaa bogga internetka: helsinki.fi/naktergalen. Halkaas waxaa ku jira macluumaad ku saabsan kulamadu sida ay u soconayaan iyo carruurta iyo tababareyaasha ka soo qaybqaatay warbixinadooda.

Satakieli ma lacag baa? Sidee ayaan ilmahayga uga diiwaan galin karaa?

Barnamijka Satakieli in laga qaybqaato waa lacag la'aan. Tababareyaashu waxqabadka ay diyaariyaan way noqon karaan kuwo lacag ah markaasna waalidka ayaa kharashka ilmaha bixinaya. Tababareyaashu waxaayse ku dadaalaan inay kulamada lacag la'aan ama jabni ku qabanqaabiyaan. Kulamada wadajirka ah ee barnaamijka lagu qabanqaabiyo muddada tababarku uu socdo waa lacag la'aan.

Dhammaan dadka iyo qoysaska xiiseynaya Satakieli waxaay iska soo diwaan galin karaan foomka eletroniga ah. Skaangaree QR-koodhkan si aad ugu gudubto bogga isdiwaangalinta ama ku qor linkagan boggaaga internetka: elomake.helsinki.fi/lomakkeet/136034/lomake.html. Markaas kaddib waxaan kugu soo dhaweyneynaa mid ka mid ah warbixinada dugsiyada lagu qabanqaabiyo.

Waxaad dooran kartaa wakhti adiga kugu habboon:

- 16.9.2025 Hoplaxskolan saacadda 18.00–19.30
- 17.9.2025 Staffansby lågstadieskola saacadda 18.00–19.30
- 22.9.2025 Nordsjö lågstadieskola saacadda 18.00–19.30
- 25.9.2025 Botby grundskola saacadda 18.00–19.30.

In ilmuhu uu ka qaybqaato kulamada warbixinta ah midkood ayaa shardi u ah in barnaamijka loo doorto. Macluumaad dheeraad ah ayaa ka qaybqaateyaasha looga soo dirayaa Wilma-da marka wakhtiga kulanku uu dhamaado. In laga soo qaybqaato kulanka warbixintu hubaal kama dhigayo in ilmahaaga loo helo tababare, laakiin waan ku dadaalaynaa inaan helno tababare habboon. Ilmaha ka qaybqaatay barnaamijka Satakieli ma heli karaan tababare cusub.

Macluumaad dheeraad ah:

Näktergalen projektledare:
Richard Backman
+358 40 86 99 330
richard.backman@helsinki.fi

Kontaktperson Hoplaxskolan:
Elvi Fogdell
+358 40 831 3013
elvi.fogdell@edu.hel.fi

Kontaktperson Staffansby:
Ronja Saaresaho
+358 40 643 4417
ronja.saaresaho@edu.hel.fi

Kontaktperson Botby & Nordsjö:
Jenny Nyman
+358 40 865 2380
jenny.nyman@edu.hel.fi

QR kod till elektronisk anmälan:
QR-code to sign up digitally:





MENTORSPROGRAMMET

NÄKTERGALEN

LEK OCH LÄRDOMAR TILLSAMMANS

Näktergalen finansieras av:



Svenska
kulturfonden



SVENSKA
FOLKSKOLANS
VÄNNER



STIFTELSEN
Tre Smeder